
# Macluumaad




Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaad waadax ah oo ku saabsan caafimaadkaaga iyo adeegyada kala duwan oo la helli karo, sida xalalka gaarka ah iyo kuwa guud.

Waxaad u baahan tahay inaad bixiso macluumaad warqab ah ka hor intaan lagu daaweyn. Taas macneheedu waxa weeye waa inaad si buuxda u fahamtaa xalalka daaweyntaada, faaiidada iyo khasaaraha iman kara, iyo qiimaha.

Waa inaad siisaa macluumaad ku saabsan xalalka caafimaadkaaga, meesha la aadayo, waqtiga sugitaanka iyo haddii aad u baahan tahay inaad wax uun bixiso.

Haddii wax qaldamaan inta lagu jiro daryeelka caafimaadkaaga, waxaad xaq u leedahay in laguu sheego wixii ku saabsan arrinta. Adeega caafimaadku waa inuu sharxaa wixii dhacay, siday kuu saamaynayso iyo wixii la sameeyey si daryeelka looga dhigo amaan.

# Barayfasi




Waxaad xaq u leeadahay in barayfasigaaga la xafido. Tan waxaa ku jirta barayfasiga jirkaaga, waxaad leedahay, macluumaadka iyo goobta shakhsiyeed.

Macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo macluumaadka daaweynta waxaa waajiba in la ilaaliyo ayna ahaadaan qarsoodi.

# Bixi aragti

Waxaad xaq u leedahay inaad bixiso aragtiga ama samayso dacwad. Welwelkaaga waa in wax looga qabtaa si furan iyo waqti maangal ah. Bixinta aragtida ama dacwada maaha inay si qalad ah u saamayso sida laguu daaweeyey.

La wadaagida khibradaadu waxay wanaajin kartaa tayada iyo daryeelka caafimaadka.

Haddii aad welwel ka qabto in xuquuqdaada aan wax laga qaban, la hadal dhakhtarkaaga ama ururka adeega caafimaadka. Haddii aadan sidaas samayn karin, ama aadan ku faraxsanayn jawaabta, la xiriir ururka ashtakada caafimaadka ee Dawlad goboleedkaaga.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan jaartarka ururka ama faahfaahinta la xiriirida ururka caafimaadka wixii dacwa ah, booqo:

**www.safetyandquality.gov.au/your-rights**




Level 5, 255 Elizabeth Street
Sydney NSW 2000

GPO Box 5480
Sydney NSW 2001

Telefoonka: (02) 9126 3600
mail@safetyandquality.gov.au

**safetyandquality.gov.au**

SAWIR (SCAN) IGA QAAD

AUSTRALIAN COMMISSION ON SAFETY AND QUALITY IN HEALTH CARE

JUUN 2024

# Xuquuqdayda daryeelka caafimaadka

SOMALI | SOOMAALI



AUSTRALIAN COMMISSION ON SAFETY AND QUALITY IN HEALTH CARE

Waxaad xaq u leedahay amaanka si loo badbaadiyo daryeel caafimaad oo heer sarre ah, sida lagu sharxay **Australian Charter of Healthcare Rights (The Charter)**.


Jaartarku wuxuu sharxaya waxa adiga ama qof kale oo aad daryeeshaa ay filan karaan markay helayaan daryeelka caafimaad.

Xuquuqda waxaa lagu dabakhaa qof walba iyo meel kasta oo daryeel caafimaad lagu bixiyo Australia gudaheeda.

Qaado waqti aad ku akhrido fahamna xuquuqdaada.




## Helitaanka





Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel caafimaad kaas oo wax ka qabanaya baahidaada

Medicare wuxuu caawimaa qiimaha aragtida dhakhtarka, iyo weliba daaweyn badan iyo daawooyin. Waxaad xaq u leedahay inaad ogtahay inaad ogaato, ka hor inta aadan helin daaweynta, haddii ay jirto daaweyn iyo lacag la iska qaadayo oo aad u baahan tahay inaad bixiso.

Ururada adeegyada caafimaadka waxay u baahan yihiin inay bixiyaan bay'ad u ogolaanaysa dadka qaba inay isticmaalaan adeegyadooda.

## Amaanka





Waxaad xaq u leedahay inaad hesho amaan iyo daryeel aad u sarreeya oo caafimaad kaas oo buuxinaya mustawayaasha qaranka.

Daryeelkaaga caafimaad iyo daaweynta waa in lagu saleeyaa caddaynta ugu sarraysa oo la heli karo, iyo waxaad u baahan tahay oo aad doorbidayso.

Haddii aad welwel ka qabto wax ku saabsan caafimaadkaaga, ogeysiinta isbedel welwel leh, ama u malaynayso wax ku dhaafay, waxaad xaq u leedahay inaad weydiiso dib u eegid.

## Ixtiraam




Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo si sharaf leh, lehna ixtiraam iyo naxariis.

Waa in lagu weydiiiyaa waxaad u baahan tahay, daryeelkaaguna waa inuu ka muuqdaa waxaad rabto.

## Ka qaybgelida




Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo qof xaq u leh ahaan kuwa bixiya daryeelkaaga caafimaadka. Waxaad awoodaa inaad weydiiso su'aallo intaad u baahan tahay. Dhakhtarkaagu waa inuu kaala hadlaa wixii ku saabsan daryeelka si furan oo daacadnimo ah.

Waxaad ku dari kartaa dad kale oo ku jira daryeelkaaga, sida qoysas, saaxiibo, daryeelle ama u doodaha macaamiisha.